# Qiimeynta Baahiyaha Bulshada ee LGBTQIA2S+ ee Minnesota

## Ku Saabsan Sahanka:

Guddiga LGBTQIA2S+ ee Minnesota ayaa samaynaya qiimeyn baahiyaha bulshada oo dhammaystiran, oo ay ku jirto sahan baahiyaha bulshada ee heer gobol ah. Sahankan waa fursad loogu talagalay shakhsiyaadka LGBTQIA2S+ ee da'doodu tahay 18 sano jir ama ka weyn, iyo waalidiinta carruurta LGBTQIA2S+ si ay ula wadaagaan waayo-aragnimadooda, caqabadahooda, iyo mudnaantooda si loo qaabeeyo siyaasadaha, barnaamijyada, iyo dadaalka u doodista baahidooda ee Minnesota.

**Guudmar Guddiga:**

Guddiga LGBTQIA2S+ ee Minnesota waxaa aasaasay Baarlamaanka Minnesota si uu ugu shaqeeyo hirgelinta sinnaanta dhaqaale, bulsho, sharci, iyo siyaasadeed ee bulshada Minnesota ee ka kooban dadka aqoonsada inay yihiin lesbian, gay, bisexual, transgender, gender expansive, queer, intersex, asexual, iyo/ama laba-ruux (two-spirit).

Waajibaadka sharci ee guddigu waxaa ku jira inuu noqdo isku xiraha bulshada iyo dowladda, iyo inuu la taliyo Guddoomiyaha, Baarlamaanka, iyo hay'adaha kale ee dawladda ee arrimaha saameeya shakhsiyaadka LGBTQIA2S+.

Guddigu waxa uu caawiyaa in la hubiyo in dadka LGBTQIA2S+ ee Minnesota laga matalo dowladda gobolka isla markaana mas'uuliyiintu helaan talo khabiir ah oo ku saabsan arrimaha LGBTQIA2S+. Shaqooyinka aasaasiga ah ee guddigu waa u doodid, cilmi-baaris, ka-qaybgal bulsho, iyo wacyigelin dadweyne.

**Guudmar Qiimeynta Baahiyaha Bulshada:**

Qiimeynta Baahiyaha Bulshada oo ka kooban saddex qaybood ayaa ururin doonta aragtiyo muhiim ah oo ku saabsan baahiyaha, mudnaanta, iyo caqabadaha ay la kulmaan bulshada LGBTQIA2S+ ee Minnesota. Qiimeyntan waxay gacan ka geysan doontaa qaabaynta siyaasadaha, mudnaanta maalgelinta, iyo dadaalka u doodista si bulshada si wanaagsan loogu adeego.

Waxaan xogta iyo aragtiyada ku ururin doonaa:

- Sahanka Baahiyaha Bulshada ee LGBTQIA2S+ ee Minnesota oo loogu talagalay dadka 18 sano jirka ama ka weyn
- Wadahadallada Bulshada oo lala yeesho xubnaha bulshada ee aan si weyn loo matalin

- Sahanka Ururada iyo Bixiyeyaasha adeegyada ee loogu talagalay ururada u adeega dadka LGBTQIA2S+ ee Minnesota Isku-xirayaasha Muuqaallada ASL & Dadka Maqal/Arag La'aanta ah:

Haddii aad raadinayso ilooyin diiradda saaraya ASL ama bulshada Maqal/Arag la'aanta ah si ay kaaga caawiyaan buuxinta sahanka, waxaad booqan kartaa boggayaga YouTube adigoo gujinaya isku-xirayaasha hoose:

- Isku-xirka Muuqaalka Sahanka Baahiyaha Bulshada ee ASL
- Isku-xirka Muuqaalka ASL ee ku habboon Dadka Maqal/Arag La'aanta ah

**Sababta Aad Uga Qaybqaadanayso Sahanka:**

- Saameyn go'aamada heer gobol ee saameeya bulshooyinka LGBTQIA2S+
- Gacan ka geyso in la hago maalgelinta iyo ilaha halka ugu baahan
- Hubi in sahanku ka tarjumayo codad iyo waayo-aragnimo kala duwan

**Yaa Ka Qaybqaadan Kara:**

- Shakhsiyaadka LGBTQIA2S+ ee da'doodu tahay 18 sano ama ka weyn oo ku nool Minnesota
- Waalidiinta iyo daryeelayaasha carruurta LGBTQIA2S+ ee ka yar 18 sano oo ku nool Minnesota

**Waxa La Filayo:**

- Sahanku wuxuu qaadanayaa qiyaastii 20–30 daqiiqo in lagu dhammaystiro
- Jawaabahaaga waa qarsoodi oo aan la aqoonsan karin
- Su'aal kasta looma baahna. Waa hagaag in aad dhaafto su'aal kasta oo aadan ku raaxaysan inaad ka jawaabto.

Waxa lagu waydiin doonaa:

- Dareenkaaga amniga jirka iyo kan shucuurta
- Dareenkaaga ku aaddan xidhiidhka bulshada
- Caafimaadkaaga maskaxeed iyo kan jireed
- Waayo-aragnimadaada marka aad raadinayso caawimaad iyo helitaanka adeegyo
- Macluumaadkaaga demografiga ah (qowmiyadda, jinsiga, iwm)

Waxaanu qadarinaynaa inaad waqti u hurtay inaad codkaaga ku darto dadaalkan. Waanu garanaynaa in su'aalaha qaar ay keeni karaan dareen adag. Waa hagaag inaad dhaafto su'aal kasta oo aadan rabin inaad ka jawaabto. Haddii aad rabto inaad la hadasho qof ama hesho taageero kale, fadlan eeg bogga ilaha taageerada.

**Sirta Sahanka**

**Ilaalinta Qarsoodigaaga ee Qiimeynta Baahiyaha Bulshada**

Jawaabahaaga sahanka waa qarsoodi oo aan la aqoonsan karin. Sababtoo ah waxaan si dhab ah u ilalinaa arrimaha asturnaanta, waxaan qaadnay tallaabooyin dheeraad ah si aan u ilaalinno dadka ka qaybqaadanaya iyo xogta la ururiyo. Hoos ka akhri faahfaahinta sida aan u hubinay in jawaabaha sahanka ay ahaadaan kuwo gaar loo leeyahay.

**Waa Maxay Xogta Dadweynaha?**

Minnesota gudaheeda, inta badan xogta ay ururiyaan hay'adaha dawladda (sida MNQT) waxaa loo tixgeliyaa xog dadweyne, taas oo micnaheedu yahay in dadka kale ay codsan karaan inay helaan. Si kastaba ha ahaatee, noocyo xog ah – sida xogta gaar loo leeyahay ama qarsoon – waxaa ilaalinaya sharciga mana lagu wadaagi karo dadweynaha.

**Sida Aan U Ilaalino Xogtaada:**

Si loo hubiyo in jawaabahaaga sahanka ay ahaadaan kuwo gaar loo leeyahay oo ammaan ah, waxaan la shaqaynaynaa hay'adda Minnesota Management Analysis and Development (MAD), taas oo ah hay'ad dawladeed oo ku takhasustay cilmi-baarista isla markaana leh shuruudo asturnaan dheeraad ah oo uu farayo sharciga gobolka.

**Sababta Ay La Shaqeynta MAD U Bixiso Ilaalinta Dheeraadka ah ee Asturnaanta:**

MAD waa waax ka tirsan Minnesota Management and Budget (MMB) oo bixisa adeegyo cilmi-baaris iyo qiimeyn ah oo loogu talagalay hay'adaha dawladda. Si ka duwan inta badan hay'adaha dawladda kale, MAD waxay leedahay ilaalin sharci oo dheeraad ah oo ku hoos jirta Minn. Stat. 13.62 taas oo u oggolaanaysa inay si ammaan ah u maamusho xogta:

- **Ka-dhaafidda Codsiyada Xogta Dadweynaha** – Sharciga Minnesota hoostiisa, inta badan xogta hay'adaha dawladda waa dadweyne, laakiin xogta ay ururiso ama falanqayso MAD looma bandhigi karo codsiyada xogta dadweynaha si la mid ah kuwa kale. Tani waxay la micno tahay in jawaabaha sahanka shakhsiyaadka aan lagu heli karin si guud, ilaa iyo inta MAD ay xogta la wadaagayso hay'ado kale (faahfaahin hoose).
- **Ilaalinta Cilmi-baarista Qarsoon** – MAD waxay raacdaa nidaamyo adag oo u oggolaanaya xogta qaarkeed in loo kala saaro mid aan dadweyne ahayn ama mid qarsoon, taas oo hubinaysa in jawaabaha shakhsiyaadka aan waligood la shaacin — xitaa marka la soo saaro warbixino guud.

- **Ka Saaridda Xogta Laga Yaabo In Lagu Garto –** Ka hor inta aan MAD la wadaagin xogta sahanka hay'addeena ama cid kale, waxay ka saari doonaan jawaabaha kasta xog kasta oo laga yaabo in lagu garto qofka. Tusaale ahaan, haddii qof uu

magacaabo goobtiisa shaqo su’aal furan, MAD waxay tirtiri doontaa magaca goobta shaqada ka hor inta aanay noo gudbin faylka xogta.

**Ka Saaridda Xogta Laga Yaabo In Lagu Garto –** Ka hor inta aan MAD la wadaagin xogta sahanka hay’addeena ama cid kale, waxay ka saari doonaan jawaabaha kasta xog kasta oo laga yaabo in lagu garto qofka. Tusaale ahaan, haddii qof uu magacaabo goobtiisa shaqo su’aal furan, MAD waxay tirtiri doontaa magaca goobta shaqada ka hor inta aanay noo gudbin faylka xogta.

**Sida MNQT u Naqshadeysay Sahanka si loo Yareeyo Khatarta Asturnaanta:**

Marka lagu daro iskaashiga MAD, MNQT waxay si taxadar leh u diyaarisay su’aalaha sahanka iyadoo maskaxda ku haysa ilaalinta xogta. Qaar ka mid ah su’aalaha demografiga – sida da’da, magaalada aad degan tahay, qowmiyadda, jinsiyadda, iyo jinsiga – waxay kordhin karaan khatarta aqoonsi dib loogu garto qofka (reverse identification), taas oo macnaheedu yahay in jawaabaha qofka loo adeegsan karo in lagu garto. Si khatartaas loo yareeyo iyadoo weli la ururinayo xog qiimo leh, waxaan qaadnay go’aamo muhiim ah oo ay ka mid yihiin:

- **Xadididda Ururinta Xogta Demografiga –** Waxaan dooranay su’aalo gaar ah oo demografiyadeed si loo yareeyo khatarta aqoonsi dib loogu garto, iyadoo weli la helayo xog faa’iido leh.
- **Inaan La Ururin Xogta Qowmiyadda ama Koodhka Zip-ka –** Khatarta aqoonsi dib loogu garto waxay si gaar ah u sarreysaa dadka laga tirada badan yahay ee diinta ama jinsiyadda ku kala duwan ee ku nool Minnesota, gaar ahaan meelaha aan magaalooyinka ahayn. Si aan u ilaalinno qarsoodiga iyo badbaadada dadka ka qaybqaadanaya, waxaan doorannay inaanan weydiin macluumaad ku saabsan qowmiyadda, koodhka zip-ka, ama diinta.
- **Xog Goboleed oo leh Tallaabooyin Dheeraad ah oo Asturnaanta ah –** Iyadoo la raacayo talooyinka ururada bulshada, waxaan ku darnay su’aal guud oo ku saabsan gobol ahaan meesha qofku degan yahay. Si kastaba ha ahaatee:
    - MAD ayaa falanqayn doonta xogta goboleedka waxayna siin doontaa hay’addeena dulmar guud.
    - MNQT waxay heli doontaa oo keliya xog muujinaysa in qofku ku nool yahay 7-da degmo ee ku hareeraysan magaalooyinka mataanaha ah (Twin Cities metro area) ama Minnesota guud ahaan – ma heli doono faahfaahin kale oo heer shaqsiyeed ah.
    - Tani waxay hubinaysaa in xogta goboleed ay ahaato mid la ilaaliyo oo aan lala xiriirin karin qof gaar ah.

Mudnaanta ugu weyn ee naqshadeynta sahankan waa badbaadada iyo asturnaanta dadka LGBTQIA2S+ ee Minnesota ee nagu kalsoon inay nala wadaagaan waayo-aragnimadooda. In kasta oo tallaabooyinkan ay lagama maarmaan u yihiin ilaalinta, waxaan aqoonsannahay in qaybaha lagu weydiinayo su’aalaha demografiga aysan si buuxda u

matali karin kala duwanaanta aqoonsiyada iyo waayo-aragnimada bulshada. Waxaan fahamsanahay in arrintani laga yaabo inay dadka qaar ka dareensiiso in aqoonsigooda dhamaystiran aanu si buuxda uga muuqan.

Inkasta oo caqabado jira, haddana waxaan rabnaa inaan dib u xaqiijino aqoonsiga ballaadhan ee aan si buuxda u qadarinayno — oo ay ku jiraan aqoonsiyo, qowmiyado, iyo waayo-aragnimooyin kala duwan — ee bulshada LGBTQIA2S+ ee Minnesota. Habka aanu u shaqayno wuu sii kobcayaa, waxaana ka go'an inaan sii wanaajino ka mid noqoshada (inclusivity) sahannada mustaqbalka anagoo mudnaanta siinayna badbaadada iyo asturnaanta dhammaan dadka ka qaybqaata.

## Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo (FAQ):

**Ujeeddada qiimeynta baahiyaha waa maxay?**
Qiimeynta Baahiyaha Bulshada LGBTQIA2S+ ee Minnesota waa mashruuc ballaadhan oo lagu ogaanayo mudnaanta iyo caqabadaha horyaalla bulshooyinka LGBTQIA2S+ iyadoo la adeegsanayo saddex qaybood:

1. **Sahanka Baahiyaha Bulshada** – ururinta aragtiyada shakhsiyaadka,
2. **Wadahadallada Bulshada** – dooddo kooxeedyo yar yar oo diiradda saaraya codadka bulshada aan si weyn loo matalin,
3. **Sahanka Lammaanayaasha Bulshada** – qiimeynta baahiyaha iyo caqabadaha hay'adaha u adeega bulshooyinka LGBTQIA2S+.

Ujeeddadu waa in xogtan loo isticmaalo samaynta talooyin siyaasadeed, maamulka, iyo maalgelin oo loo gudbiyo Guddoomiyaha, Baarlamaanka gobolka, iyo hay'adaha dawladda ee Minnesota.

### Yay yihiin xubnaha bulshada LGBTQIA2S+ ee aan rabno inaan u adeegno?
Guddiga LGBTQIA2S+ ee Minnesota wuxuu u adeegaa dhammaan dadka Minnesota ee aqoonsada inay yihiin lesbian, gay, bisexual, transgender, gender expansive, queer, intersex, asexual, laba-ruux (two-spirit), iyo/ama aqoonsiyo kale oo ku jira hooska queer.

### Haddii aan ahay xubin ka mid ah bulshada LGBTQIA2S+ iyo sidoo kale waalid/daryeelle qof ka tirsan bulshada LGBTQIA2S+ oo ka yar 18 jir, waa kee sahanka aan buuxinayo?
Su'aasha ugu horreysa ee sahanka waxay ku weydiin doontaa inaad tahay qof qaangaar ah oo ka tirsan bulshada LGBTQIA2S+ mise waalid/daryeelle ka tirsan bulshada LGBTQIA2S+ oo da'doodu ka yar tahay 18. Jawaabta aad bixiso ayaa go'aamin doonta nooca sahanka aad qaadanayso. Haddii aad isu aqoonsato inaad tahay labadaba xubin bulshada ah iyo waalid/daryeelle, dooro sahanka aad rabto inaad qaadato. Waxa kale oo aad buuxin kartaa hal sahanka ka dibna aad ku laaban kartaa midka kale haddii aad rabto.

## Haddii aan ahay xubin ka tirsan bulshada LGBTQIA2S+ laakiin aan ka yarahay 18 sano, ma qaadan karaa sahanka?

Nasiib darro, maya. Si aad uga qaybqaadato sahanka, waxaa loo baahan yahay oggolaanshaha waalidka. Laakiin helitaanka oggolaanshahaas si elektaroonig ah waa adag. Inkasta oo aadan adigu buuxin karin sahanka, waxaad weydiin kartaa waalid ama daryeelle inuu buuxiyo sahanka adiga kugu saabsan.

## Baahiyaha ama caqabadaha gaarka ah ee la qiimeynayo waa maxay?

Waxaan ognahay in dadka ka tirsan bulshada LGBTQIA2S+ ay la kulmaan sinnaan la'aan marka loo eego bulshada kale sida helitaanka daryeel caafimaad, dakhli, hoy ammaan ah oo la awoodi karo, caafimaad maskaxeed, balwad, iyo kuwo kale. Waxa kale oo aan ognahay in dadka LGBTQIA2S+ ay si badan u la kulmaan rabshado, takoorka, iyo aflagaaddo. Sinnaan la'aantani way sii kordhaa marka qofku leeyahay aqoonsiyo kale oo laga tirada badan yahay. Ilaa hadda, xogteenna waxay ka timid sahanno qaran ama ururin xogeedyo yaryar oo gudaha Minnesota ka dhacay. Qiimeyntan cusub ee baahiyaha bulshada waxay noqon doontaa tan ugu dhammaystiran ee lagu sameeyo bulshada LGBTQIA2S+ ee Minnesota 30-kii sano ee la soo dhaafay. Waxay na siin doontaa sawir dhamaystiran oo muujinaya sida waayo-aragnimada shakhsiyaadka ay ula xiriiri karto sinnaan la'aanta aan aragno, iyo aragtiyo ku saabsan xeeladaha ugu waxtarka badan ee lagu taageerayo bulshada LGBTQIA2S+.

## Hababka aan u adeegsan doono ururinta xogta

Qiimeynta baahiyaha bulshada waxay ka kooban tahay saddex qaybood: sahan bulsho, wadahadallo lala yeesho xubnaha bulshada LGBTQIA2S+ ee aan si buuxda loogu adeeggin ama aan si taariikhi ah loo matalin, iyo sahan lammaanayaasha bulshada. Labadayada sahan waa kuwo onlayn ah waxaana si ballaaran u wadaagi doona lammaanayaasha bulshada ee Minnesota oo dhan. Inta badan su'aalaha waa kuwo dhowr doorasho leh; si kastaba, waxaa jira su'aalo furan dhamaadka sahanka. Waxaan sidoo kale la shaqeyn doonaa lammaanayaasha bulshada si aan u abaabulno wadahadallo bulsho oo aan u soo xulno ka qaybgalayaal. Xidhiidhka lala leeyahay lammaanayaasha bulshada waa mid aad muhiim u ah, gaar ahaan marka aan isku dayeyno inaan la xiriiro xubnaha bulshada ee aan si taariikhi ah loo matalin ama loo adeeggin.

## Sidee MNQT mudnaanta u siisay xirfadda dhaqan ahaan iyo ka mid noqoshada qiimeynta?

Intii uu socday habka qorshaynta, waxaan la shaqeynay xubnaha bulshada iyo ururada u adeega dadka LGBTQIA2S+ si aan u horumarino qalabka sahanka oo ah mid wadajir leh oo dhaqan ahaan u habboon. Waxaan qabannay wada sheekaysiyo gaar ah, kalfadhi wacyigelin ah, waxaana nuqulka sahanka la wadaagnay lammaanayaasha bulshada si ay u bixiyaan talo iyo jawaab celin aan ku darnay nuqulka ugu dambeeya ee sahanka.

## Afafkee ayaa sahanku ku jiri doonaa?

Sahanku wuxuu ku jiri doonaa ASL, Ingiriisi, Hmong, Carabi, Isbaanish, Soomaali, iyo Faransiis.

## Sidee MNQT u hubin kartaa qarsoodiga iyo asturnaanta xogta la ururiyo?

Jawaabahaaga sahanka waa qarsoodi oo aan la aqoonsan karin. Si loo hubiyo ammaanka xogta, waxaan la shaqaynay Minnesota Management Analysis and Development (MAD), oo ah hay'ad dawladeed oo leh ilaalin sharci oo u saamaxaysa inay si ammaan ah u maamusho xogta iyadoo adeegsanaysa habraacyo asturnaan oo dheeraad ah. Si ka duwan inta badan hay'adaha dawladda, xogta cilmi-baarista ee MAD lagama helo codsiyada diiwaannada dadweynaha, taas oo micnaheedu yahay in jawaabaha shakhsiga ay sii ahaanayaan kuwo la ilaaliyo. Sidoo kale, waxaan si taxaddar leh u naqshadeynay su'aalaha sahanka si loo yareeyo khataraha asturnaanta, oo ay ku jirto xaddididda ururinta xogta demografiyadeed iyo hubinta in xogta goboleed aan lagu garan karin qof gaar ah. Mudnaanta koowaad ee aanu leenahay waa ilaalinta badbaadada iyo asturnaanta dadka LGBTQIA2S+ ee Minnesota iyadoo aan ururinayno xog qiimo leh. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan arrimaha asturnaanta, fadlan booqo bogga asturnaanta (Privacy Page).

## Sidee MNQT u falanqayn doontaa xogta?

Marka sahanku xirmo, waxaan dib u eegi doonaa dhammaan jawaabaha si aan u "nadiifinno" xogta oo aan uga saarno jawaab kasta oo laga yaabo inay ka timid bot. Kadib, waxaan adeegsan doonaa farsamooyin tirakoob iyo xisaabeed oo kala duwan si aan u baarno qaababka, xiriirrada, iyo isbeddellada xogta. Qaar ka mid ah farsamooyinkani way fudud yihiin (tusaale ahaan boqolkiiba dadka isku aqoonsada jiho galmo gaar ah), laakiin qaar kalena way adag yihiin. Waxaan rabnaa inaan natiijooyinka u soo bandhigno si soo jiidasho leh oo si fudud loo fahmi karo. Ujeeddadu waa inaan dadka u sheegno sheeko xogtan ku saleysan.

## Maxaa tallaabo ah oo la qaadi doonaa iyadoo lagu salaynayo natiijooyinka?

Macluumaadka aan ururino waxaa loo adeegsan doonaa hagidda go'aannada siyaasadeed, dadaallada u doodista, iyo qorshaynta adeegyada. Natiijooyinka waxaa la siin doonaa xubnaha bulshada, ururada bulshada, iyo dadweynaha.

## Sidee MNQT u hubin kartaa in wada-shaqeynta iyo jawaab celinta bulshada LGBTQIA2S+ ay sii socoto?

Waxaan sii wadi doonaa inaan la furnaano bulshada inta lagu jiro ururinta xogta, falanqaynta jawaabaha, iyo marka ugu dambeysa ee aan la wadaagno natiijooyinka. Waxaan aqoonsannahay in dowladda ay taariikh ahaan xogta ka soo saartay bulshada iyada oo aan siin fursad xubnaha bulshada inay ka qaybqaataan ama ka faa'iidaystaan aqoonta la ururiyay. Marka xogta la ururiyo oo aan xaqiijino in dhammaan macluumaadka lagu garan karo dadka ka qaybqaata laga saaray, natiijooyinka waxaa lala wadaagi doonaa bulshada. Waxaan rajaynaynaa in lammaanayaasha bulshada ay u adeegsan doonaan

aqoontan sidii ay u wanaajin lahaayeen adeegyada iyo u doodista bulshada LGBTQIA2S+ ee Minnesota.

## Ururadu ma wadaagi karaan sahankan?

Haa, dabcan. Waxaan rajaynaynaa in shakhsiyaad iyo ururoba ay si ballaaran u wadaagi doonaan sahankan. Haddii aad rabto inaad heshid qalabka sahanka lagu xayeysiinayo, fadlan nala soo xiriir.

## Maxaa ka joojinaya qof inuu laba jeer buuxiyo sahanka?

Ma jiro wax kale oo ka joojinaya marka laga reebo dhererka sahanka. Waa suurtagal in la sameeyo nidaam hubinaya in hal jawaab keliya laga diro cinwaan IP ah, laakiin taasi waxay ka hor istaagi lahayd dad isku guri ama isticmaalaya qalab isku mid ah (lamaanayaal, saaxiibo iwm.) inay dhammaystiraan sahanka. Walaaca yar ee aan ka qabno jawaabo soo noqnoqda ma aha mid ka weyn dhibaatooyinka ka dhalan kara xaddidaadda IP-ga.

## Dhallinyaro badan oo queer iyo trans ah ma haystaan xiriir qoys oo ammaan ah. Sidee codadkooda loogu dari karaa iyadoo aan waalidka la joogin?

Sharci ahaan uma samayn karno sahan dadka ka yar 18 sano. Waxaan ognahay in dhallinyaro badan aysan haysan daryeelle taageersan oo ka qaybqaadan kara sahanka waalidka. Qayb ka mid ah Qiimeynta Baahiyaha Bulshada, waxaan samayn doonaa sahan ururada u adeega bulshada LGBTQIA2S+, waxaana rajaynaynaa in sahankaas uu na siiyo aragtiyo ku saabsan baahiyaha, welwelka, iyo caqabadaha dhallinyarada queer iyo trans. Waxaan aqoonsannahay in tani ay tahay xaddidaad, balse waxaa naga go’an inaan horumarino ka qaybgalka tooska ah ee dhallinyarada mustaqbalka si sharci iyo dhaqan ahaanba habboon.

## Anigu waxaan ahay LGBTQIA2S+, laakiin si guud uguma dhawaaqin. Ma qaadan karaa sahanka?

Haa, looma baahna inaad si guud u shaacisay aqoonsigaaga si aad u qaadato sahankan. Waxaan soo dhoweynaynaa waayo-aragnimada dadka meel kasta oo ay marayaan safarkooda. Jawaabahaagu waa qarsoodi.

## Ma khasab baa inaan hal mar dhammeeyo sahanka mise waan joojin karaa oo dib ayaan ugu laaban karaa?

Haa, waxaad joojin kartaa sahanka bartankiisa; si kastaba, horumarkaaga waxa la kaydin doonaa keliya haddii aad ku soo laabato sahanka adigoo adeegsanaya isla qalabkii iyo browser-kii.

## Anigu ma degani Minnesota. Ma qaadan karaa sahanka?

Mashruucan wuxuu ku kooban yahay dadka deggan Minnesota. Haddii aad ku nooshahay gobol kale, waxaan kugula talinaynaa inaad la xiriirto wakiilladaada la doortay iyo/ama ururada u adeega LGBTQIA2S+ si aad ula wadaagto welwelkaaga, u hesho kheyraad, ama

u qorshayso mashruuc qiimeyn baahiyaha ah.
Haddii aad xiisaynayso inaad u guurto Minnesota ama u safarto daryeel caafimaad, waxaad buuxin kartaa sahan adigoo adeegsanaya Shabakadda ilooyonka Minnesota ee Dadka Trans iyo Intersex ah (Minnesota Trans & Intersex Resource Network) halkan: Minnesota Trans & Intersex Resource Network

## Waxaan degganahay Minnesota qayb ka mid ah waqtiga. Maka qeyb qaadan karaa sahanka?

Haddii aad isu aragto inaad tahay deggenaansho rasmi ah ee Minnesota, haa.

## Ma khasab baa inaan ka jawaabo dhammaan su'aalaha?

Maya, su'aalaha waa ikhtiyaari. Looma baahna inaad ka jawaabto su'aal kasta oo aadan ku raaxaysan ama aadan dareemin inaad rabto inaad ka jawaabto.

## Waxaa jira erayo badan oo sahanka ku jira oo aanan garanayn. Sideen ku ogaan karaa micnahooda?

Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah erayada lagu isticmaalay sahankayaga iyo sharraxaadooda. Haddii ay jiraan erayo kale oo aadan aqoon, ururka GLAAD ayaa diyaariyay qaamuus dheer oo erayadan lagu sharaxayo, waxaadna ka daawan kartaa halkan: Qaamuuska Erayada: LGBTQ | GLAAD

- Bisexual+ ama M-spec: erey kooban oo loo adeegsado xubnaha ku jira isbeddelka jiho galmo badan ama jiho jidheed badan, kuwaas oo lagu qeexo aqoonsiyo badan oo bisexual+ ah, oo ay ku jiraan dadka isu aqoonsada bisexual, pansexual, omnisexual, biromantic, polysexual, ama kuwa si dareen ah u beddelanaya (sexually fluid).
- Two-Spirit (Laba-ruux): Ereyga "Two-Spirit" waa turjumaad toos ah oo ka timaadda luqadda Ojibwe, "Niizh manidoowag." Waxaa badanaa loo adeegsadaa in lagu tilmaamo qof jirkiisu isla mar ahaantaas xambaarsan yahay ruux lab ah iyo ruux dhedig ah. Mararka qaar waxaa sidoo kale loo adeegsadaa si guud, si loogu muujiyo isku-jirka laba ruux oo bini'aadam oo kala duwan.
- Queer: waa eray guud oo lagu tilmaamo dadka aan isu aqoonsan inay yihiin heterosexual ama cisgender.
- Asexual: waa shakhsiyaad aan la kulmin rabitaanka galmada sida caadiga ah ee bulshada lagu qeexo; waxaa jira siyaabo badan oo loo dareemi karo asexuality, sida (laakiin aan ku xaddidnayn) in la yeesho dareen galmo oo aad u yar ama aan jirin, ama kaliya marka uu qofku sameeyo xiriir shucuur adag.
- Non-binary (Aan-lab-dheddig ahayn): waa aqoonsi jinsiyeed oo aan ku habboonayn kala soocidda lab ama dheddig; waxaa jira siyaabo badan oo qofku isu aqoonsan karo meel ka baxsan lab/dheddig, oo ay ka mid tahay in qofku aanu isku aqoonsanayn midkood ama uu isu arko inuu yahay labadaba.
- Intersex: waa shakhsiyaad ku dhasha astaamo jireed oo aan si buuxda ugu habboonayn kala soocidda jinsiga lab ama dheddig.

- Polyamorous: waa xiriir uu qof ama in ka badan ka mid ah dadka xiriirka ku jira uu si jaceyl ama galmo ah ula jiro in ka badan hal qof isku mar. Dhammaan dadka xiriirka ku jira waa inay ogyihiin una oggol yihiin xaaladdaas aan ahayn mid hal qof keliya (non-monogamous).
- Neurodivergent: waa eray aan caafimaad ahayn oo lagu tilmaamo dadka maskaxdoodu si ka duwan "caadiga" u shaqeyso, u barato, ama u dhaqanto. Waxaa jira noocyo badan oo neurodiversity ah oo ay ka mid yihiin autism, ADHD, OCD, Down Syndrome, iyo dyslexia.
- PrEP: waa soo gaabinta *pre-exposure prophylaxis*. Waa daawo loogu talagalay dadka HIV-negative ah laakiin khatar ugu jira inay qaadaan HIV marka ay la xiriiraan galmo. Qaadashada PrEP si joogto ah ka hor inta aan la la kulmin fayraska HIV si weyn ayey u yaraysaa halista qofku uu ku qaadi karo fayraska.
- Qoys la doortay (Chosen family): mararka qaar waxaa sidoo kale loo yaqaan "qoysaska la helay (found families)"; waa koox dad ah oo nolosha qofka ku jira oo buuxiya kaalinta qoyska taageerada ah.
- GSA: taariikh ahaan waxay u taagnayd "Gay-Straight Alliance," balse si loogu daro xubnaha kala duwan ee jinsiga bulshada LGBTQIA2S+, hadda badanaa waxaa loo isticmaalaa inay u taagnaato "Gender-Sexuality Alliance." Kuwani waa ururo ay maamulaan ardayda (inta badan iskuullo) kuwaas oo mideeya dhalinyarada LGBTQIA2S+ iyo xulafadooda si ay u dhisaan bulsho una abaabulaan arrimaha saameeya noloshooda.

## Aqoonsi iyo Mahadnaq:

Waxaan u muujinaynaa mahadnaq iyo qadarin dhab ah ururada iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ee nala kaashanaya taageeridda sahankan qiimeynta baahiyaha bulshada. Dadaalka joogtada ah ee lammaanayaasha bulshada ee dib u eegista sahanka iyo wacyigelinta wuxuu ka caawinayaa in la hubiyo in codadka dadka LGBTQIA2S+ ee Minnesota laga maqlo. Mashruucan suurtagal ma noqon lahaa la'aantood.

Iskaashiyadan waxay door muhiim ah ka ciyaaraan xoojinta bulshada, iyagoo hubinaya in go'aannada ku saleysan xogta ay ka tarjumayaan baahiyaha iyo waayo-aragnimada dhabta ah. Waxaan aad ugu mahadcelinaynaa sida ay uga go'an tahay kor u qaadista iyo u doodista bulshooyinkeena.

Mahadsanid lammaanayaasha sahanka ee qaybta ka ah shaqadan muhiimka ah:

- OutFront Minnesota
- Gender Justice
- Transforming Families
- Our Space
- Queerspace Collective
- MN POC Pride
- Trans Northland

- Queermunity
- Aliveness Project
- Transforming Generations
- Wilder Research

## Kheyraadka Sahanka:

Waad ku mahadsan tahay buuxinta Sahanka Baahiyaha Bulshada.
Si aad u hesho kheyraadyo dheeraad ah, fadlan booqo Bogga Kheyraadka Bulshada (Community Resources Page)

Haddii aad raadinayso kheyraadyo ku habboon bulshada ASL ama dadka Maqal/Arag la'aanta ah si ay kaaga caawiyaan buuxinta sahanka, waxaad booqan kartaa boggayaga YouTube adigoo gujinaya isku-xirayaasha hoose:

- **Isku-xirka Muuqaalka Sahanka Baahiyaha Bulshada ee ASL** (ASL Community Needs Survey Video Link)

- **Isku-xirka Muuqaalka ASL ee ku Habboon Dadka Maqal/Arag la'aanta ah**. ASL Deaf/Blind Friendly Community Needs Survey Video Link